# Khabiirada oo Khibradda leh: Shanta tilmaamood ee loogu talagalay inuu Maxamed Ingiriiska ku barto

## Khibradda Maxamed

Maxamed waxuu ka dhiganaayey dugsiga Suuriya illaa sannadka 11 marka isaga iyo xubnaha qoyskiisa ay ka soo barakaceen Egypt dagaalka dartiisa. Dugsiga ku yaala Suuriya, waxuu bilaabay barashada Ingiriisiga qiyaastiii sannadka shanaad ama lix laakiin maadaamaa ayasan ahayn maadada uu jecel yahay, waxuu sameeyay horumar yar. Inkastoo uu jecelaan lahaa inuu hagaajiyo Xirfadiisa luuqadeed, haddana weligiisa kuma fikirin inuu u baahnaan doono inuu ku hadlo Ingiriisiga maalin walba.

Si dhakhso ah maanta- Maxamed wuxuu joogay UK muddo hal sano ah oo wuxuu uga hadlaa ingiriisiga si fasiix ah inkasta oo uu imaaday bilo ka hor bilowgii cudurka ee Covid-19 iyo bandowga xigay. Marka sidee Maxamed uga baxay inuu ku hadlo wax yar oo Ingiriisi ah oo si fasiixna ugu hadlo hal sano gudaheeda? Kheyraadkani wuxuu ka gudbeyaa talooyinka ugu sareeya ee Maxamed inuu ahaado mid la dhiirigeliyay, helitaanka hal abuurka iyo ka haritaanka diiridda so loo hagaajiyo xirfadooyinka luuqadda.

### Talada #1: Soo hel waxa kugu dhiirigelinaayo!

Maxamed wuxuu diiridda saaray sida Ingiriisiga ugu caawin lahaa si ugu taageero qoyskiisa siyaabo kala duwan. Mid ka mid ah xubnaha qoyskiisa aad ayuu u xanuunsanaa markay ku noolaayeen Egypt oo wuxuu rabay inuu ka caawiyo ballamaha ee UK sida uu halkaas ku sameynaayey. Wuu ogaa in fahamka iyo ku hadalka Ingiriiska uu siin doono qalabyada ay ku bixiyaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u fahmaan nidaamka daryeelka caafimaadka ee UK oo ay u helaan daryeelka u baahan yihiin.

Sidoo kale, sida ay ula tahay Maxamed, isaga oo yahay nin Carab ah wuxuu dareemayaa inay muhiim tahay inuu shaqeeyo si uu u taageero qoyskiisa oo wuxuu shaqeynaaye laga soo bilaabo isaga oo da'dii uu yaraa. Xitaa dugsiga sare ee Suuriya, Waxa uu ka shaqeynaaye maqyaada adeerkiisa iyo marka uu ku noolaa Egypt, waxuu shaqeynaaye toddobo maalmood usbuuciiba, maalin dhif ah ayuu fasax qaadan jiray. Hadda Uk, weli wuxuu dareemayaa muhiimada ay leedahay inuu shaqeysto lacag si uu ugu taageero qoyskiisa oo wuu ogyahay inuusan awoodin inuu tan sameyo iyada oo aan la helin xirfado Ingiriisi ah oo xoog leh.

Marka ka caawi qoyska inaad ku taageerto sida aad u aqoonsan lahayd waxa iyaga dhiirigelinaya! Tani waxay noqon kartaa inaad u raadiso shaqo, helitaanka shatiga

wadista gaariga ama awood u lahaanshaha inay la socdaan shaqada dugsiga carruurtooda.

### Talada #2: Sameey tiknoolijiyada ee uga badan

Xitaa ka hor cudurka Covid-19, Maxamed wuxuu helay barashada onlaynka oo uu oggol yahay inuu wax ku barto qaabkasta oo ku habboon isaga. Qaar ka mid ah qaababka uga jecelyahay in loo isticmaalo tiknoolijiyada wax lagu barto waa:

- Ku soo degso Google Assistant app taleefoonkaaga oo hadal ahaan weydii su'aalo ku saabsan naxwiga ama hingaadda. Waad weydiin kartaa app-ka ereyo qaarkood inuu kuu hingaadiyo, ku dhawaaqo dhawaaqyo kala duwan ama xitaa waxaad weydiin kartaa su'aalo oo ah naxwiga sida- waa maxay farqiga u dhaxeeya wax yar iyo xoogaa?
- U isticmaal eJOY English app si aad ugu darto ciwaanka qoraalada ee muuqaalada aad ka daawato YouTube-ka iyo adeegyada socodka. Wuxuu kuu oggolaanayaa inaad keydiso erayada cusub aad baratay inta aad daawaneyso oo waxay ku weydiin karaan erayada muuqaalada aad daaweyneyso.
- Haddii aad iskaaga isdhiirigeliso, aad ku barato guriga, daawashada muuqaalada ESOL ee YouTube-ka waxay noqon kartaa qaab wanagsan si xooga loo saaro meelaha aad ugu baahan tahay inaad ku celceliso ugu badnaan. Gaar ahaan bilaabataanka marka waxaa laga yaabaa inaad xishooto sameynta khaladaadka, waad ku celcelin kartaa adoo ku celinaya waxaad ka maqashay muuqaalka ilaa aad ku raaxeystid oo aad waqti badan ku qaadatid naxwiga meesha kugu adagyahay.
- Soo dejiso Muuqaalada YouTube-ka mawduuca aad xiiseyneyso MP3s ahaan oo ku dhageyso iyaga agagaarka guriga ama markaad bannaanka aado sidaas darteeda waxaad marwalba haysataa qof ku hadlaya ingiriisiga Madaxaaga gudahiisa. Haddii uu yahay wax mar hore aad garaneyso, xitaa way ka sii fiican tahay, sida aadba horey u fahmeysay mawduuca oo waxaad awood u yeelan doontaa inaad diiridda saarto erayada cusub.

### Talada #3: Diiridda saar waxa aad xiiseynayso

Sannadkii la soo dhaafay, Maxamed wuxuu ogaaday inuu hagaajiyo erayadiisa cusub oo si dhaqso leh wax u barto markuu diiridda saaraayo waxa uu xiiseynaayo.

Haddii aad xiiseenaysid ciyaaraha, wararka ciyaaraha daawo oo akhri kooxyadaada aad jeceshahay ama raac ciyaaraha Ingiriiska meesha ay ka ahaan lahayd luuqadaada aad u dhalatay. Haddi aad jeceshahay siyaasadda sameey dadaal aad ku dhageysato ama daawo wdone wararka Ingiriisi ahaan. Haddii gabeyga yahay mid aad xiiseeneyso, raadi gabayada aad ugu jeceshahay Ingiriiisi ahaan. Sidoo kale haddii aad tahay qof kasaayo diinta, isku dey inaad ku akhriso sidoo kale docooyinka Ingiriisi ahaan. Waxaad soo dejisan kartaa Qur'aanka Ingiriisi iyo Carabi oo akhri iyagana labo dhinac waa qaab aad ku barato erayo cusub.

## Talada #4: Dhis aasaas adag

Loogu talagalay Maxamed, hal ka mid ah qaybaha ugu adag ee barashada Ingiriisiga runtii waxay tahay xarfaha waxay sameyn karaan dhawaaqyo kala duwan waxay ku saleysan tahay ereyga ama xididka ee ereyga ah. Ingigiriisiga wuxuu leeyahay xidid luuqadaha badan oo kala duwan sidaas awgeed ma raaco wax sharci ah oo isku mid ah. Sababtaan awgeed, waa muhiim in la fahmo sida loogu dhawaaqaayo isku darka xarfta kala duwan (ing, ish, ist, sh- tusaale ahaan).

## Talada #5: Go'aanso sababta aad u rabto inaad u barato Ingiriisiga

Tani way ku caawin doontaa diiridda saar wax la baranaayo iyo sida wax loo barto. Marka laga reebo inaad awoodo si ula xariirto xubnaha kale ee bulshidaada, ma dooneysaa inaad barato Ingiriisiga si aad u wado waxbarashadaada ama keliya si aad shaqo u hesho?

Haddii aad rabto inaad shaqeyso, diiridda saar inta badan ku hadalka iyo dhageysiga. Naxwiga iyo qoraalka wuxuu noqon doonaan mid muhiim ah ilaa xad si kastaba ha ahaatee, shaqooyinka badankooda aad codsaneyso, wax ugu muhiimsan wuxuu noqon doonaa inaad awoodo inaad si fiican ula xariiri karto.

Haddii aad rabto inaad si wadato waxbarashada, saar diiriida naxwaha oo ku laabo aasaaska samey sida aad sameysay markaad ilmo aheed. Hubso aasaaskaaga luuqadda wuu inuu yahay mid adag oo ka dhis halkaas. Tani waxay kaa caawin doontaa qoraalkaaga kaas oo aad muhiim ugu ah inaad sii wadato waxbarashadaada. Xirfadahaaga dhageysiga iyo ku hadalka ayaa ku dhismi doona halkaas.